# Tilmaamaha Malawad-baaridda

**Ka soo iibso saadkan soo socda farmashiyaha degaankaaga:**

**2 - Kiniiniyada Bisacodyl**
(Calool-jilciyada Dulcolax® MA AHAN saxarro jilcisada Dulcolax®) kiniini kasta waxaa ku jira 5 mg oo bisacodyl ah

**2 – Dhalo 8.3 wiqiyadood oo Budada Polyethylene Glycol (PEG) 3350 ah**
(MiraLAX, SmoothLAX, ClearLAX ama wax nooc ahaan u dhigma)

**128 wiqiyadood oo Gatorade® ah** (Aan ahayn midabka guduudan/cas)
Gatorade®, Gatorade G2®, Powerade®, Powerade Zero® ee caadiga ah ama Pedialyte ayaa la aqbali karaa. Midabka guduudan lama oggola; dhammaan midabyada kale (jaalle, cagaar, oraanji, buluug-guduud, buluug) waa la oggolyahay. Waxaa sidoo kale la oggolyahay in la soo iibiyo xirmooyinka 2.12 wiqiyadood ee Gatorade budada ah oo lagu dari karo biyo illaa mug wadareed 64 wiqiyadood dareere ah.

**1 - Dhalo 10 wiqiyadood oo Magnesium Citrate** (Aan ahayn midabka guduudan/cas)
Waxaa sidoo kale caadi ah in aad isticmaasho xirmada 0.5 wiqiyadood ee magnesium citrate budo ah (17 garaam) oo lagu qasey/darey 10 wiqiyadood oo biyo ah.

**DIYAARGAROWGA LOOGU TALOGALAY MALAWAD-BAARIDDA**

**Baaji ama dib-u-dhigo ballantaada:**
Haddii aad ku khasbantahay in aad baajiso ama dib-u-dhigato ballantaada, fadlan sida ugu dhaqsiyaha baddan ee suurtagalka ah u wac 612-871-1145.

**Gaadiidka:**
Waa in aad la qabanqaabiso gaadiidka aad raacayso maalinta qaliinka qof weyn oo mas'uul ah. Gaadiid taksi ah in aad raacdid ma ahan doorasho fiican aan ka ahayn haddii uu ku raacayo qof weyn oo mas'uul ah. Haddii aad la qaban-qaabin weyso gaadiidka qof weyn oo mas'uul ah, qaliinkaaga waa la baajin doonaa ballantaadana dib ayaa loo dhigi doonaa.

**<u>Ka hor 7 maalmood:</u>**

- Waxaad joojisaa qaadashada maaddada dheefshiidka sahasha ee dheeriga ah iyo daawooyinka ku jirta birta (iron). Kuwani waxaa ka mid ah fitimiinnada baddan ee la socda birta, Metamucil iyo Fibercon.
- Xaqiiji daraawalka kuu soo raacaya qaliinkaaga.

**<u>Ka hor 3 maalmood:</u>**

- Bilow qaadasha Cunto ay Ku Yartahay Maaddada Dheefshiidka Sahasha. Cuntada ay ku yartahay maaddada dheefshiidka sahasha waxa ay gacan ka geysataa in ay ka dhigto hufidda mid aad wax-ku-ool u ah.
    - Tusaalooyinka cuntada ay ku yartahay maaddada dheefshiidka sahasha waxaa ka mid ah (balse aanan ku ekayn): rootiga cad, Bariis cad, baasto, buskut, kalluun, digaag, ukumo, hilib lo'aad shiidan, subagga

looska oo kareem ah,  khudaar la karkariyay/la uumiteeyay/la kariyay, miro la qasacadeeyay, moos, qaro, caano, caano-fadhi cad, farmaajo, goosaar ansalaato lagu darsado iyo waxyaabaha kale ee cuntada dhadhanka u yeela.

- Kuwan soo socda lama oggolo in lagu daro cuntada ay ku yar tahay maaddada dheefshiidka sahasha: miraha, looska, daangada, buunshaha, qamadi, galley, badarka kenwa (quinoa), miro iyo khudaar cayriin ah, miraha la qalajiyay, digirta iyo misirta.

Hadaad rabto faah-faahinno dheeraad ah oo ku saabsan cuntada ay ku yartahay maaddada dheefshiidka sahasha ee soo socda, fadlan eeg https://www.mngi.com/conditions/low-fiber-diet

**Ka hor 2 maalmood:**

- Jooji in aad cunto cuntooyinka adag subaxdii.
- Ku Bilow Cunto Dareere ah oo Cad (dareerayaasha cad waxaa ka mid ah waxyaabaha aad wax ka dhex arki kartid).
    - Tusaalooyinka cuntada dareeraha ah ee cad waxaa ka mid ah: biyo, shaah (aan caano lahayn ama kareem aan caano ahayn), maraq cad ama fuud, Gatorade, Pedialyte ama Powerade, cabbitaanka soodhada iyo kuwa aan soodhada ahayn (Sprite, 7-Up, Gingerale), casiir furuto oo la miiray oo aan lahayn qashir (tufaax, cannab cad,  karamberr cad), Jell-O iyo jallaato-qori.

    - Kuwaan soo socda lama oggolo in lagu daro cuntada dareeraha ee cad: dareerayaasha guduudan, cabbitaanka khamriga, kafeega, waxyaabaha caanaha laga sameeyo, borotiinka la ruxo, maraq kareem, casiirka leh qashirka iyo tubaakada la ruugo.
- **Inta u dhaxeysa 4-6pm**:   Cab Miralax – diyaarinta Gatorade

Ku qas 1 dhalo oo Miralax iyo 64 wiqiyad oo ah Gatorade garaafo weyn.
Cab galaas 1 - 8 wiqiyadood oo ah milanka/qoorshta Miralax/Gatorade.
Sii-wad in aad cabto galaas 1 - 8 wiqiyadood ah 14 daqiiqo kasta markaas ka-dib illaa iskudarka uu ka dhammaado.

**Ka hor 1 maalin:**

- Sii-wad Cuntada Cabbitaanka Cad
- **Duhurkii**:  Qaado 2 kiniini oo ah Bisacodyl (Dulcolax)
- **Inta u dhaxeysa 4-6pm**:  Cab Miralax – diyaarinta Gatorade

Ku qas 1 dhalo oo Miralax iyo 64 wiqiyad oo ah Gatorade garaafo weyn.
Cab galaas 1 - 8 wiqiyad oo ah milanka Miralax/Gatorade.
Sii-wad in aad cabto galaas 1 - 8 wiqiyadood ah 14 daqiiqo kasta markaas ka-dib illaa iskudarka uu ka dhammaado.

**Talooyinka Nadiifinta Malawadka:** Cab qaddar cabitaan oo kugu filan ka hor iyo ka dib nadiifinta malawadkaaga si aad uga hortagto in aad fuuqbaxdo. Waxaad joogtaa meel u dhow musqul sababta oo ah waxaad yeelan doontaa shuban. Xataa haddii aad musqusha fadhido, sii-wad in aad cabto milanka nadiifinta 15 daqiiqo kasta. Haddii aad dareento lalabo ama matag, biyo ku luq-luqo, waxaad qaadataa 15 ilaa 30 daqiiqo nasasho ah ka dibna sii-wad in aad cabto milanka. Waxaad dareemaysaa raaxo la'aan ilaa saxarada ay kaga soo baxdo mindhiciirkaaga weyn (ku dhowaad 2-4 saacadood). Waxaad dareemi kartaa qar-qaryo**.**

**Maalinta qaliinkaaga:**
Waxaad qaadan kartaa dhammaan daawooyinkaaga subaxdii oo ay ka mid yihiin daawooyinka dhiig karka, dhiig khafiifiyeyaasha (haddii uusan ku amrin xafiiskeena in aad kuwaan joojisid), methadone, daawooyinka ka hortagga qalalka oo lala qaadanayo kabashooyin yar-yar oo biyo ah 3 saacadood ka hor habraacaaga ama waqti ka hor ah. Ha qaadanin insulin ama faytamiinaad ka hor habraacaaga.

Sii-wad Cuntada Cabbitaanka Cad. Iska ilaali dareeraha guduudan, cabbitaanka khamriga, kafeega, waxyaabaha caanaha laga sameeyo, borotiinka la ruxo, iyo tubaakada la ruugo.

- **ka hor 4 saacadood:** Cab 10 wiqiyadood oo magnesium citrate ah
- **ka hor 3 saacadood:**
    - JOOJI qaadasha dareere oo dhan.
    - Afka waxba haka qaadanin inta lagu guda jiro waqtigan.
    - U oggolow waqti dheeraad ah in aad u soo socotid qaliinkaaga iyada oo laga yaabo in aad u baahato oo aad istaagto si aad u isticmaasho musqul inta aad jidka ku soo jirtid.

Waxaad diyaar u tahay qaliinka haddii aad raacday tilmaamaha oo dhan oo aadan lahayn wax saxaro ah, balse dareere jaalle ama cad. Haddii aadan hubin haddii mindhiciirkaaga weyn uu nadiif yahay, fadlan ka soo wac xafiiskeenna 612-871-1145 ka hor inta aadan u soo bixin ballantaada.

**Soo qaado xilliga qaliinkaaga kuwaan soo socda:**

- Soo qaado foomka Taariikhda Caafimaadka oo dhammeystiran oo ku jira xirmadan maalinta ballantaada.
- Kaarka Caymiska / Aqoonsi Sawir leh
- Liiska Daawooyinkaaga Hadda oo ay ka mid yihiin daawooyinka farmashiga la isaga soo gato iyo kuwa dheeriga ah
- Soo qaado daawada la neefsado ee samatabixinta haddii aad hadda mid isticmaasho si aad ugu xakameyso neefta
- Soo qaado saadka muraayadaha indhaha la gashto maadaama lagu weyddiin doono in aad iska bixiso muraayadaha indhaha la gashto ka hor bilowga habraacaaga.
- Amarrada Rasmiga ah ee Horumarsan: Haddii aad haysato Amar Horumarsan, fadlan u soo qaado nuqulka Amarkaaga Horumarsan ballantaada baaritaanka guda-ku-jirka. Amarrada Rasmiga ah ee Horumarsan laguma oggola xarumaha MNGI, iyo haddii ay jirto xaalad nolosha halis gelinaysa, tallaabooyin taageero nololeed ayaa la diyaarin doonaa arrin gaar ahaan ah kasta bukaanadeennana waxaa la geyn doonaa xarun daryeel heer sare ah (oo loola jeedo, cusbitaal). Dhacdada aan dhici karin ee aad u baahato wareejinta xaaladda deg-degga ah ee xarun daryeel oo heer sare ah, Amarkaaga Rasmiga ah ee Horumarsan waa in laguu raaciyo xarunta.

**SHARAXAADDA MALAWAD-BAARIDDA**

**Waa maxay malawad-baarid?**

Malawad-baaridda waa baaritaanka ugu saxsan ee lagu oggaanayo burooyinka malawadka iyo kaansarka malawadka, iyo baaritaanka kaliya ee burooyin lagu bixin karo. Inta lagu guda jiro qaliinka, dhakhtar ayaa eegaya dahaarka mindhiciirkaaga/xiidmahaaga weyn iyo malawadka isaga oo adeegsanaya tuubo jilicsan oo loo yaqaano qalabka baarista malawadka (colonoscope). Qalabka baarista malawadka (colonoscope) waxaa la geliyaa futada waxaana si tartiib ah loogu sii durjiyaa mindhiciirta/xiidmaha weyn.

Si loo soo saaro natiijooyinga ugu wanaagsan, waxaad cabbi doontaa cabbitaan loo diyaariyay nadiifin si uu gacan ugu geysto nadiifinta mindhiciirkaaga/xiidmahaaga weyn. Xataa haddii saxaradaadu ay tahay mid nadiif ah, waa muhiim in aad u qaadato dhammaan cabbitaanka loo diyaariyay mindhiciirka weyn sida laguu amray sababtoo ah jirkaaga had iyo jeer waxaa uu sameeyaa dareere xataa buro yar ayaa ku dhuuman karta dareerahan gadaashii.

**Maxaa dhacaya inta lagu guda jiro malawad-baaridda?**

Qorshee in aad ku qaadato illaa 2 saacadood xarunta lagu eego guda-ku-jirka maalinta malawad-baaridaada. Qaliinka laftiisa waxaa uu qaataa ku dhowaad 20 illaa 40 daqiiqo in lagu dhammeeyo.

**Ka hor qaliinka:**

Taariikhda caafimaadkaaga ayaa waxaa dib-u-eegis kuugula sameynayo kooxdaada daryeelka caafimaad oo ay ka mid yihiin kalkaaliyahaaga caafimaad, dhakhtarkaaga caloosha iyo mindhiciirada iyo bixiyaha adeegga suuxinta iyo khad mara xiddidada ayaa lagu gelin doonaa.

**Inta lagu guda jiro qaliinka:**

Inta lagu guda jiro qaliinka bixiyaha adeegga suuxinta waxaa uu ku siin doonaa daawooyin ka dibna waxaa uu kormeeri doonaa calaamadaha muhiimka ah ee ah hannaan loo yaqaano Daryeelka Suuxinta ee La Kormeero (MAC). Iyada oo bukaannada badankooda ay seexdaan inta uu socdo qaliinka oo dhan, qaarkood waa kuwo soo-jeeda oo ogaal-leh. Dhakhtarka suuxinta iyo/ama kalkaaliyaha diiwaangashan ee aqoonta u leh suuxinta (CRNA) waxa ay gacan ka geysan doonaan go’aaminta noocyada habboon ee daawada ay tahay in la isticmaalo inta lagu guda jiro habraaca si ay kaaga dhigto qof ammaan ah oo raaxo dareemaya. Haddii nude aan caadi ahayn ama buro la helo, dhatakhtarka waxaa uu ku soo saari karaa qalabka baarista malawadka si uu ugu sameeyo baaritaan dhow ama dheecaanka jirka laga qaado oo lagu oggaado cudurka (biopsy).

**Maxaa dhacaya ka-dib qaliinka?**

Dhakhtar ayaa kaala hadli doona natiijooyinka bilowga ah ee qaliinkaaga waxaa uuna u diyaarin doonaa warbixin buuxda bixiyaha daryeelka caafimaad ee kuu soo diray malawad-baaridda. Waxaad yeelan kartaa xoogaa calool maroojis ah ama dibirro ka-dib qaliinka oo ah wax caadi ah waana in si dhaqso ah u baaba’aan adiga oo dhuusaya. Muunado nude ama buro kasta ee la soo saaro inta lagu guda jiro qaliinka waxaa shaybaar loogu dirayaa in lagu soo qiimeeyo. Waxa ay qaadan kartaa 5-7 maalmood in laguugu soo oggeysiiyo natiijooyinka boostada ama Mareegtada Bukaanka.

Waxaad dib-u-bilaabi kartaa hawlahaaga caadiga ah maalinta ku xigta qaliinka. Hase-yeeshee, daawada la siiyay xilliga qaliinka waxa ay kaa mamnuucayaan in aad gaari wadid maalinta inteeda kale. Waxaa sidoo kale laguu gula talinayaa in aad ka fogaadid socdaal diyaaradeed 24 saacadood ka-dib qaliinka. Waxaad dib-u-bilaabi kartaa cuntada caadi ahaan aad cunto, balse khamriga waa in la iska ilaaliyaa ilaa iyo maalinta xigta ka-dib qaliinkaaga.

**Ma jiraan dhibaatooyin suurtagal ah oo ka dhalan kara malawad-baaridda?**

Inkasta oo dhibaatooyinka halista ah ay yihiin kuwo dhif ah, qaliin caafimaad kasta waxa uu yeelan karaa khatarro. Khataraha ka dhalan kara qaliinka waxaa ka mid ah daloolin, ama dillaac gaari kara dahaarka mindhiciirka/xiidmaha weyn, dhiigbaxa goobta

dheecaanka jirka laga qaaday, falcelinta daawooyinka, dhibaatooyinka wadnaha iyo sambabada, iyo dhaawacyada ilkaha ama indhaha.

# Malawad-baaridda – Baaritaanka marka la barbardhigo Oggaanshaha Cudurka

Xeerka Daryeelka La Awoodi-karo (ACA) waxaa uu uga baahanyahay shirkadaha caymiska gaarka loo leeyahay in ay caymiyaan adeegyada ka hortagga ee lagu taliyay iyada oo aysan jirin kharash-wadaagga bukaanka, sida lacag-bixinnada la wadaago iyo ka-jarisyada. Mid ka mid ah adeegyadaas lagu taliyay waa malawad-baaridda baaritaanka ah. Tani waxaa loola jeedaa haddii bukaan lagu sameeyo malawad-baaridda baaritaanka ah ma jirayo wax kharashaad ah oo uu jeebkiisa ka bixinayo. Taa waxaa ka duwan, haddii bukaanka lagu sameeyo malawad-baaridda oggaanshaha cudurka, qaliinka waxaa ku dhowaad had iyo jeer caymiya caymiska; hase-yeeshee bukaanka waxaa uu weli mas'uul ka yahay wax kasta oo ah lacag-bixinada la wadaago, caymiska la wadaago iyo/ama ka-jarisyada.

**Waa maxay farqiga u dhaxeeya malawad-baaridda baaritaanka ah iyo malawad-baaridda oggaanshaha cudurka?**

- Malawad-baaridda baaritaanka ah waxaa lagu sameeyaa bukaan aan astaamo lahayn iyada oo ujeeddadu tahay in laga baaro kaansarka malawadka ama burada mindhiciirka/xiidanka weyn. Haddii wax aan caadi ahaan lagu oggaado iyo haddii kaleba ma beddelayso ujeeddada baaritaanka ee qaliinka.
- Malawad-baaridda oggaanshaha cudurka ayaa la sameeyaa iyada oo sabab u ah calaamad ama astaan sida shuban, baaritaanka dhiigga saxarada ee hemoccult oo laga helay ah, dhiibaxa malawadka, dhiigyarida iyo yaraanshaha birta, xannuun aan caadi ahayn, ama natiijo aan caadi ahayn oo ku saabsan baaritaan kale. Medicare iyo bixiyeyaasha kale ee ganacsiga ah kama tanaasulaan lacagaha la wadaago iyo/ama ka-jaridda haddii ujeeddada qaliinku ay tahay malawad-baaridda oggaanshaha cudurka. Tani waxaa loola jeedaa bukaanka waxaa uu mas'uul ka yahay baaqi kasta ee hara ee lagu leeyahay ka-dib marka caymiska uu ka baraandego xaq sheegashada.

**Waxaan leeyahay Medicare - waa maxay dheefaha baaritaanka?**

Medicare waxaa ay caymisaa malawad-baaridda baaritaanka ah 10 sanno kasta* oo loogu talogalay halista dhex-dhexaadka ah, bukaanada aan lahayn calaamado iyo 2 sanno kasta oo loogu talogalay halista sare, bukaanada aan lahayn calaamado. Medicare waxaa ay u qeexaysaa halista sare sida bukaanada leh mid ama in ka baddan kuwaan soo socda:

- Qaraabo darajada-koowaad ah (walaal, waalid, cunug) oo ku dhacay kaansarka malawadka ama burada adenomatous
- Taariikhda qoyska ee burada adenomatous ee la xiriirta qoyska
- Taariikhda qoyska ee kaansarka malawadka aan burolayda ahayn ee la kala dhaxlo
- Taariikhda shaqsi ee burada adenomatous
- Taariikh shaqsi ee kaansarka malawadka
- Cudurka mindhiciirada oo caabuq leh, oo ay ka mid yihiin cudurka Crohn ama cudurka xiidmaha

*Malawad-baaridda baaritaanka ah lama caymiyo 47 bilood gudahooda ee baaritaanka xiiddanka hore

**Waxaan leeyahay caymis gaar loo leeyahay/ganacsi - halkee ayaan ka heli karaa dheefaha baaritaankeyga?**

Waa in aad si toos ah ula xiriirto shirkadda caymiskaaga, adiga oo isticmaalaya macluumaadka ku qoran xagga dambe ee kaarkaaga caymiska. Diyaar u noqo in aad bixiso lambarada qorshahaaga. Waxaan kugu caawin karnaa waraaq qiimo-sheeg oo ku qoran summadaha qaliinka (CPT) ee shirkadaada caymiska laga yaabo in ay weyddiiso. Ogsoonow in aannu go'aamin karin ka hor malawad-baaridaada dhab ahaan waxa la heli doono inta lagu guda jiro habraaca iyo summadaha CPT ee saxa ah ee la soo gudbin doono qaansheegooda.

Ka hor qaliinkaaga, waa in aad oggaato haddii aad u imaanayso malawad-baaridda baaritaanka (aan lahayn calaamadda) ama malawad-baaridda oggaanshaha cudurka (adiga oo leh calaamado). Ka-dib marka la go'aamiyo haddii baaritaan ama oggaansho cudur lagu dabakhayo, waa in aad la sameyso xoogaa baaris ah shirkadaada caymiska oo khuseeya dheefahaaga iyo kharashaad kasta oo qofka jeebkiisa ka bixinayo laga yaabo in la dabakho.

Dhakhtarkaaga soo gudbinta iyo/ama dhakhtarkaaga daryeelka aasaasiga ah ayaa kuu soo gudbin kara malawad-baaridda "baaritaanka" oo ay wehliyaan calaamadaha qaar ee aad hadda dareemayso. Waxaa laga yaabaa in si khalad ah loo fahmo ereyga baaritaan. Qaliinkaaga malawad-baaridda ma awoodo in qaansheeg loogu soo gudbiyo sida qaliin baaritaan haddii aad dareemayso wax calaamado ah. Waxaa la naga doonayaa in aan qaansheega u soo gudbino si waafaqsan sababta qaliinka loo dalbaday.

Dhakhtarka ma beddeli karo, kuma dari karo ama ma tirtiri karo wax oggaansho cudur ah sidaa awgeed waxaa laguu tixgelin karaa malawad-baaridda baaritaanka ah. Booqashadaada waxaa lagu diiwaangeliyaa diiwaanka caafimaad ee macluumaadka adiga ama dhakhtarka ku soo gubiyay iyo/ama daryeelka aasaasiga ah ay bixiyeen inta lagu guda jiray qiimeynta qaliinka ka horreeya, ama inta lagu guda jiray booqasho bukaan-eegto hore loo diiwaangeliyay marka malawad-baaridda la dalbaday. Kuwan waa dokumeentiyada sharci ahaan ku xiran ee aan la beddeli karin si loo fududeeyo caynsanaanta caymiska wanaagsan.

Bukaannada waxa ay u baahanyihiin in ay fahmaan in siyaasadaha shirkadda caymiska iyo dowladda ee adag, iyo sidoo kale dhabbe-tusayaasha summadaynta ay ka hortaggaan in dhakhaatiirta ay wax ka beddelaan shax ama qaansheeg iyada oo ujeeddadu tahay keliya go’aaminta caynsanaan wanaagsan. Tani waxaa loo tixgeliyaa in ay tahay khiyaano caymis waxaana ciqaabi kara sharciga.

Fadlan kala xiriir shirkadda caymiskaaga ama Minnesota Gastroenterology su’aalahaaga dheeraadka ah ee khuseeya caynsanaanta.

Natiijooyinka baaritaan kasta waxaa lagu soo dirayaa boosto ama Mareegtada Bukaanka.

## SIYAASADDA MAALIYADEED (Caymiska iyo Biil-bixinta)

**Mareegtada MNGI:** Booqo mareegtadeenna oo ah ***mngastro.com*** si aad u codsato qiimo-sheeg, online-ka ugu bixiso lacagta, u hesho faah-faahinada barnaamijkeenna gar-gaarka maaliyadeed iyo macluumaadka kale ee muhiimka ah.

**Hannaanka Caymiska iyo Biil-bixinta**: Waa mas'uuliyadaada in aad la xaqiijiso dheefahaaga caymiska qorshaha (qorsheyaasha) caymiskaaga ka hor booqashadaada bukaan-eegtada ama habraaca. Haddii qorshaha (qorshayaasha) caymiskaaga ay u baahan yihiin lacag-bixin la wadaago oo ballantaada ah, lacag-bixinta la wadaago waxaa lagaa rabaa waqtiga ballantaada. Waxaan weyddiisanaynaa in aad bixiso macluumaadka caymiska hadda iyo aqoonsi sawir leh waqti kasta ee aad ballan u tagto mid ka mid ah xafiisyadeena/xarumaheena. Haddaad soo bandhigi weydo kaarka (kaararka) caymiskaaga hadda waxaa ay ka siidaynaysaa Minnesota Gastroenterology, P.A. mas'uuliyad kasta ee buuxinta aan waqtigeeda dhicin ama aan saxa ahayn ee qaansheegyada qandaraaska ah. *Fadlan si dhaqso ah u ogqeysii shaqaalaheenna soo dhoweynta isbeddel kasta ee ku yimaada caymiska ama macluumaadka shakhsi.*

**Soo-gudbinta Qaansheega:** Haddii aad ina siisay macluumaad caymis, waxaan u soo gudbinaynaa qaansheeg (qaansheegyo) qorshaha (qorsheyaasha) caymiska waxaana kuu caawin doonaa si kasta oo aynu si macquul ah kuugu fududeyn karto in qaansheegyadaada la bixiyo. Hase-yeeshee, qorshahaaga (qorsheyaashaada) caymiska waxa ay u baahan karaan in aad u keento macluumaadka qaar si toos ah waana mas'uuliyadaada in aad u hoggaansanto codsigan.

**Oggolaanshaha Hore iyo Caddaynta Hore:** Haddii qorshaha (qorshayaasha) caymiskaaga ay u baahanyihiin oggolaansho hore ama caddayn hore, waxaad mas'uul ka tahay in aad ka soo wacdo Xafiiskeenna Shaqada (612) 871-1145, doorashada 5aad ka hor ballantaada shaqaalaheenana waxay kugu caawinayaan in aad hesho oggolaanshaha booqashadaada ama qaliinkaaga.

**Gudbinada:** Haddii qorshaha (qorshayaasha) caymiskaaga ay u baahan yihiin gudbin, *waxaad mas'uul ka tahay in aad ka soo hesho gudbinta bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah ama bukaan-eegtada ka hor ballantaada*.

**Biil-bixinta:** Marka qaansheegyadaada caymiska uu ka baaraan dego qorshaha (qorshayaasha) caymiskaaga, bayaan ayaa laguu soo diri doonaa oo loogu talogalay ka jarid, caymiska la wadaago, lacag-bixin la wadaago kasta ama baaqi kale ee harsan ee uusan bixin qorshaha (qorshayaasha) caymiskaaga. Haddii laguu jadwaleeyo habraac, waxaad helaysaa in ka baddan hal bayaan. Hal bayaan oo laga helayo Minnesota Gastroenterology, P.A. ayaa matali doona lacagaha ujrooyinka dhakhtarka iyo bayaan labaad oo laga helayo Xarunta East Metro Endoscopy Center LLC, MNGI Endoscopy ASC Inc., Minnesota Endoscopy Center LLC, ama cusbitaal oo ka dhigan lacagaha ujrooyinka xarunta. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa biilal gaar ah dhakhtarka baara cudurrada (Hospital Pathology Associates) haddii dheecaanka burada ama muunnada nudaha laga qaado oo lagu oggaado cudurka loo baahday iyo/ama biil laga helo shaybaarka haddii shaqo dhiig la qabtey. Haddii Daryeelka Suuxinta ee La Kormeero (MAC) uu bixiyo dhakhtar suuxin ama CRNA inta lagu guda jiro habraaca, waxaa jiraya dalacaad dheeraad ah oo biilkeeda la siinayo Community Anesthesia Partners, LLC. Fadlan ka eeg caymiskaaga loogu talogalay dheefaha gaarka ah.

**Lacag-bixin:** Lacag-bixinta oo dhammeystiran waxaa loo baahanyahay marka aad hesho bayaankaaga (bayaanadaada). Waxaan aqbalnaa lacag-bixinta lagu sameeyo kaarka deynta (Visa, MasterCard iyo Discover), jeeg shakhsi, ama amarka lacagta. Lacag-bixinada kaarka deynta iyo jeegga waxaa lagu sameyn karaa online-ka ***mngastro.com***. Haddii aad awoodi weydid in aad bixiso baaqigaaga oo dhammeystiran, waa mas'uuliyadaada in aad la xiriirto Xafiiskeenna Shaqada si aan u sameyno qorshe lacag-bixin aan dulsaar lahayn, oo lagu wada qanci karo iyo si looga wada hadlo doorashooyinka kale ee gar-gaarka maaliyadeed ee laga yaabo in la heli karo. Haddaad bixin weydo baaqigaaga iyo/ama u hoggaansami weydo qabanqaabo kasta ee la sameeyay waxaa ka dhalan kara in koontadaada loo gudbiyo hay'ad lacag-qaadis waxaana sidoo kale ka dhalan kara in aad awoodi weyso in aad ka jadwaleysato ballamo mustaqbalka Minnesota Gastroenterology, P.A. ama xarumaheeda illaa baaqiga oo dhammeystiran laga bixiyo.

**Kaalmo Maaliyadeed:** Bixinta daryeelka mindhiciirada ee ugu fiican waa mid inoo muhiim ah iyada oo aan la eegayn xaalka maaliyadeed ee qofka. Waxaannu leenahay fursado gar-gaar oo la heli karo si loo tixgeliyo xaalado maaliyadeed oo kala duwan. Fadlan kala soo xiriir Xafiiskeenna Shaqada (612) 871-1145 (doorashada 5aad) hadaad rabto macluumaad khuseeya Barnaamijkeenna Gar-gaarka Maaliyadeed.

*Shaqadeenna waxa ay u go'day bixinta daaweynta ugu wanaagsan ee bukaannadeena. Waad ku mahadsantahay doorashada Minnesota Gastroenterology, P.A. iyo fahamidda iyo u hoggaansanka macluumaadkeenna maaliyadeed. Haddii aad qabto wax su'aalo ama walaac ah oo khuseeya macluumaadkan, fadlan kala xiriir Xafiiskeenna Shaqada (612) 871-1145 (doorashada 5aad).*